# Suurat Adh-Dhaariq

# سُورَةُ الطَّارِقِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Samada iyo Xiddigga guura.

وَٱلسَّمَآءِ وَٱلطَّارِقِ ١

2. Ma taqaan Xiddigga guura.

وَمَآ أَدۡرَىٰكَ مَا ٱلطَّارِقُ ٢

3. Waa Xiddig ifa.

ٱلنَّجۡمُ ٱلثَّاقِبُ ٣

4. Ee Nafwalba waxaa kor jooga ilaaliye (Malag).

إِن كُلُّ نَفۡسٖ لَّمَّا عَلَيۡهَا حَافِظٞ ٤

5. Ee Dadku ha dayo waxa laga abuuray.

فَلۡيَنظُرِ ٱلۡإِنسَٰنُ مِمَّ خُلِقَ ٥

6. Waxaa laga abuuray Biyo booda.

خُلِقَ مِن مَّآءٖ دَافِقٖ ٦

7. Kana soobaxa Dhabar iyo laab dhexdood.

يَخۡرُجُ مِنۢ بَيۡنِ ٱلصُّلۡبِ وَٱلتَّرَآئِبِ ٧

8. Eebana waa karaa soo celinta Dadka (qiyaamada).

إِنَّهُۥ عَلَىٰ رَجۡعِهِۦ لَقَادِرٞ ٨

9. Maalinta la imtixaani waxa (Laabta) ku qarsoon.

يَوۡمَ تُبۡلَى ٱلسَّرَآئِرُ ٩

10. Dadkuna Xoog ma leh (Maalintaas) iyo wax u gargaaara midna.

فَمَا لَهُۥ مِن قُوَّةٖ وَلَا نَاصِرٖ ١٠

11. Eebana wuxuu ku dhaartay Samada Roobka leh.

وَٱلسَّمَآءِ ذَاتِ ٱلرَّجۡعِ ١١

12. Iyo Dhulka jeexma (waxna ka soo baxo).

وَٱلۡأَرۡضِ ذَاتِ ٱلصَّدۡعِ ١٢

13. Ee Quraanku waa hadal wax kala bixiya (wanaagga iyo Xumaanta).

إِنَّهُۥ لَقَوۡلٞ فَصۡلٞ ١٣

14. Ciyaarra ma aha (ee waa dhab).

وَمَا هُوَ بِٱلۡهَزۡلِ ١٤

15. Gaaladu waxbay dhakri.

إِنَّهُمۡ يَكِيدُونَ كَيۡدٗا ١٥

16. Annaguna waannu kaydi (Abaal-marin).

وَأَكِيدُ كَيۡدٗا ١٦

17. Ee u sug Gaalada wax yar.

فَمَهِّلِ ٱلۡكَٰفِرِينَ أَمۡهِلۡهُمۡ رُوَيۡدَۢا ١٧

Naf walba waxaa ilaaliya Malag’waana la xisaabin doonaa Maalinta wixii qarsoonaa la faydi, ee waa in Qalbiga, Niyada, iyo Camalkaba la wanaajiyaa, xumaan, dhagar iyo khiyaamana laga fogaado, illeen Eebe Cidna kama fakatee. Adh-Dhaariq (1-17).

# Suurat Al-Aclaa

# سُورَةُ الأَعۡلَىٰ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariis-ta.

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waynee Magaca Eebe ee Sarreeya.

سَبِّحِ ٱسۡمَ رَبِّكَ ٱلۡأَعۡلَى ١

2. Eebaha abuuray khalqiga ekee-yayna.

ٱلَّذِي خَلَقَ فَسَوَّىٰ ٢

3. Eebaha wax walba qaddaray Jid-kana tusiyey.

وَٱلَّذِي قَدَّرَ فَهَدَىٰ ٣

4. Eebaha soo bixiya Daaqa.

وَٱلَّذِيٓ أَخۡرَجَ ٱلۡمَرۡعَىٰ ٤

5. Kana dhiga markaas ka dib caws ingagagan oo Madow.

فَجَعَلَهُۥ غُثَآءً أَحۡوَىٰ ٥

6. Waxaan kuu akhriyaynaa Qu-raanka halmaaminamaysid.

سَنُقۡرِئُكَ فَلَا تَنسَىٰٓ ٦

7. Wuxuu Eebe doono mooyee, Ee-bana waa ogyahay waxa muuqda iyo waxa qarsoonba.

إِلَّا مَا شَآءَ ٱللَّهُۚ إِنَّهُۥ يَعۡلَمُ ٱلۡجَهۡرَ وَمَا يَخۡفَىٰ ٧

8. Waxaana kuu fududaynhaynaa Waddo fiican.

وَنُيَسِّرُكَ لِلۡيُسۡرَىٰ ٨

9. Ee wax waani (Nabiyow) markay wax tari waanadu.

فَذَكِّرۡ إِن نَّفَعَتِ ٱلذِّكۡرَىٰ ٩

10. Waxaa waantoobi Ruuxa Eebe ka yaabee.

سَيَذَّكَّرُ مَن يَخۡشَىٰ ١٠